



## Home Links Xirriirinta Guriga Cutubka 3: Dabeysha iyo Biyaha Toddobaadka 2

Qoysaska Qaaliga ah: Inta lagu jiro cutubkan ilmahaagu wuxuu baran doonaa dabeysha iyo biyaha. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlahaan waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: \_\_\_\_\_

<p style="text-align: center;"><b><u>Lugadda</u></b> (La xiriira <i>Gilberto and the Wind</i> and <i>One Dark Night</i>)</p> <p><b>Sheeko-sheegid:</b> U sheeg ilmahaaga sheeko ku saabsan cimilada.</p> <p><b>Bilaabayaasha Wadahadalka:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Muxuu yahay nooca cimilada ee aad jeceshahay?</li> <li>● Maxaad u jeceshahay cimilada noocan ah?</li> <li>● Sidee ayaad u dareentaa marka uu _____ (baraf da'o, roob da'o, roob baraf wataa da'o, qoraxdu soo jeedo)?</li> </ul> <p>Ereyada aad isticmaali karto inta lagu jiro wadahadalkaaga waxaa ka mid ah: <i>cimilo, duufaan, onkod, roob, hilaac, dabeyl-baraf, baraf, dabayl, duufaan (huurikayn).</i></p>	<p style="text-align: center;"><b><u>Daahfur</u></b></p> <p><b>Quusi oo Sabbee:</b> (La xiriira <i>Gilberto and the Wind</i>) Qalabka: weel nadiif ah oo weyn, qadaadiic, hagaxaan, warqad, qaaddo (caag, bir, ama loox), kubad suuf ah</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Ka buuxi weelka (ama saxanka jirka lagu dhaqdo ama saxan) biyo.</li> <li>● Ka codso ilmahaaga inuu saadaaliyo shayga quusi doona iyo ka dul sabbeyn doona biyaha. Samee laba qeybood.</li> <li>● Tijaabi walxaha.</li> </ul> <p><b>Bilaawayaasha Wadahadalka:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Miyaad u maleyneysaa in _____ (dhagaxu) uu quusi doono ama uu dul sabbeyn doono biyaha?</li> <li>● Maxaad ugu maleyneysaa in _____ (dhagax) uu quusi/dul sabbeyn doono biyaha?</li> <li>● Immisa walxood ayaa quusay? Immisa walxood ayaa dul sabbeeyay biyaha?</li> <li>● Lambarkee ayaa ka weyn ka kale ama ka yar</li> </ul> <p>Ereyada aad isticmaali karto inta lagu jiro wadahadalka waxaa kamid ah: <i>quusid, dul sabbeyn, culus, fudud.</i></p>
<p style="text-align: center;"><b><u>Hadal iyo Akhris Wadajir Ah</u></b> (20 daqiiqadood)</p> <p><b>Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Eeg jaldiga. Maxaad u maleyneysaa in buuggani uu noqon doono?</li> <li>● Waa maxay qeybta aad ugu jeceshahay sheekada?</li> <li>● Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada?</li> <li>● Maxaad u maleyneysaa inay dhici doonto marka xigta?</li> <li>● Waa ayo matalaha aad jeceshahay?</li> </ul>	<p style="text-align: center;"><b><u>Qorista</u></b></p> <p><b>Gabay:</b> Wada akhriya Tani waa gabay ay tahay in ilmahaagu barto.</p> <p style="text-align: center;"><b>Boom! Bang!</b> Boom, bang, boom, bang! Rumpety, lumpety, bump! Zoom, zam, zoom, zam! Clippety, clappety, clump!</p> <p style="text-align: center;">Rustles and bustles, And swishes and zing; What wonderful noises A thunderstorm brings! - Anonymous</p>

## Xisaabta

### **Dhageyso oo tiri:**

Qalabka: daasad, furarka dhalada ama qadaadiic

- Ka codso ilmahaaga inuu xiro indhahooda
- Marka aad 1-5 walxood ku rido daasada, weydii cunugaaga inuu si maskaxiyan ah u xisaabiyo oo uu kaa tuso farahiisa/faraheeda inta shey ee aad ku riday.
- Soo daadi walxaha oo ilmahaagu ha tiriyo.
- Ku celi adigoo ku ridayo tirooyin walxo oo kala duwan.

### **Bilaawayaasha wada---hadalka:**

- Imisa ayaad maqashay?
- Sidee baad ku garanaysaa?

## Buug-gelinta Akhrinta

Hubi maalin walba in adiga iyo ilmahaaga aad wada akhrisaan sheeko. Buugagta waxay noqon karaan kuwa ah af Ingiriisi ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan dabaysha iyo biyaha!

Isniin \_\_\_\_\_ Talaado \_\_\_\_\_ Arbaco \_\_\_\_\_ Khamiis \_\_\_\_\_ Jimco \_\_\_\_\_ Sabti \_\_\_\_\_ Axad \_\_\_\_\_

### **Buugaga aan ku akhrino dugsiga:**

*Rabbits and Raindrops* qorey Jim Arnosky

### **Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aad jeclaataan:**

*It Looked Like Spilt Milk* qorey Charles Green Shaw  
*Oh Say Can You Say What's the Weather Today?:*  
*About Weather* qorey Tish Rabe  
*The Cloud Book* qorey Tomie De Paola

## Tallooyinka si wadajir ah u akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, “**Nibble** macnaheedu waa calalin iyo qaniinyo yar.”
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, “Muxuu bakayluhu sameyn doonaa haddii uu mar kale roobku da'o?”